# Sahankii Richard Burton ee Bariga Afrika

**Cutubkii 9-aad**

**Harar ilaa Berbera**

**Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame**

**Oktoober 2, 2016**

---



Subaxii Sabtida, Janawari 13, ayaa intii aysan qorraxdu soo baxin wax badan ka hor gammaankii la kooreeyay, la xakameeyay, oo alaabteennii yarayd lagu raray. Quraac degdeg ah ka dib, ayaannu odaygii Suldaanka dhufaanka ahaa gacanqaadnay, oo inta gaadiidkayagii fuulnay waddooyinkii cidlada ahaa ciribta ku sii dhufannay. Isla markiiba, tabardarridii iyo xanuunkii ba waa i daayeen, illeen farxadi waa daawo culus e! Wardiyeyaashii oo gudaha kadaloob dab ku kulaalaya ayaannu salaan cod dheer ku sagootinnay. Markii aannu irdaha ka sii baxaynnay ayaa culays werwer iyo dareen lehi sidii dirac bir ah oo aan gashanaa iiga dhacay.

Haddana, sidaa oo ay tahay, gacaliye L[umsdenow], waxaan helay waqti aan baqalkayga dushiisa kaga fikiro sida guuli aanay naallo u lahayn. Halka guuldarradu ay ninka ragga ah dareenkiisa kiciso, guushu waxay u akhrisaa uun casharkii oraah murtiyeeddu lahayd guulaheenna oo dhammi waa sida ’harka iyo waxaan sii jirayn’. Kii yiri ’guuldarradu waa milixa nolosha’ isaguna run ayuu sheegay. Waa dhanaan nafta u roon, maskaxda u laylya isku day cusub, guushana qiimaheeda labajibbaar gaarsiiya. Sidaa ayuu hooskaa aan naallada lahayni dhakhso noo dhaafay.

Subaxu waa uu qurxoonaa. Waa cir aan daruur lahyn, qoraxi aanay qayirin, xayaabo lafcir ahi fiiqaqa buuraha meesha fog ka muuqda taash saartay, giraano qiiq ahi ay hareereeyeen xaafadaha wali hurda, hawaduna ay ka wacnayd tii cuslayd ee magaalada. Dhedadu iyada oo sidii kuulo dheemman waawayn ah ayay geedaha bunka ka lulatay,


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

digiirantuna dhirta jidka dhinacyadiisa ah ayay si aan aabayeel lahayn uga ciyaysay. Aan soo koobee, waligay, hadda ka hor, wajiga quruxda dabiiciga ahi iigu ma muuqan dhab ahaantaas wanaagsan.

Horay ayaannu u sii degdegnay, annaga oo aan rabin in aan waqti luminno oo kabaqayna ciridda Togga Erer. Toggii ayaannu jarnay, iyada oo buntukhyadu cabbaysanyihiin, dareen laga qabo warmoolay Oromo oo xas noo gasha awgi. Waxaannu soo galnay waraq afka soo kala haya, dabadeedna wadiiqo kor uga baxdana ayaannu sii tafnay. Weheliyeyaashayda aad ayay niyadu ugu dhisnayd, farxaddaa guud ahaaneedna ma dhabqin cid aan ahayn dhagarqabihii Abtidoon ahaa oo jid dadkii suuqu ka buuxaan faan aan jirin ku dheeraystay in baqalka uu fuushanyahay aannu Amiirka kaga helnay Jisyad ama baad. Xammaali oo caro la dibbiray ayaa markaa ugu hanjabay in uu bartaa ku toogto. Dabadeed, si aanan dhib yar kala kulmin ayaan aniguna xaaladdii ku dejiyay.

Garfa markii aannu maraynay, waxa aannu Midgaha ka ogaannay in Garaad Aadan uu buugtaydii u soo cid diray oo uu gurigiisa ku xareeyay. Dabadeed, si toos ah ayaannu Kondura u qabannay. Todoba saac oo duhurnimo ayaannu si nabadgelyo ah kaga gudubnay Jarka Oromada, saacad ku dhawaad ka dibna ’Alxamdu Lillaah’ ayaa naga soo kudday, markii aannu isha saarnay Shagarrax [?] iyo Banbcawseedka Maraar oo meel fog ka muuqda. Degmada markii aannu soo galnay ayaannu hubkayagii baaq ka ridnay. Dumarkii mashxarad ayay nagu soo dhoweeyeen, markii aannu deyrka sii dhaafayayna Garaado Khayra ayaa iyada oo ’Fola’ [?] samaynaysa xoogaa salool ah dusha iiga daadisay. Raggu si saaxiibtinnimo ku dheehantahay ayay noo gacanqaadeen, qaar farxadda ay ka qaadeen aragtida nolol ku soo noqoshadeenna ayay cayaar tunteen. Waxay maqaleen in nala xiray, nala garaacay, oo nala gawracay. Waxay ku dhaarteen in Garaadku uu ciidan na soo furta ama noo aarguda dumayay. Dhab ahaan, haddii aan tolkood ahaan lahayn, raynrayn badani ma muuqateen. Ugu dambayntii, Yawmul Qiyaame ayaa si qumman oo edboon inta hore ugu soo istaagay gacanta iga dhunkaday, isaga oo indhihiisa illini ku taagtaagantahay. Xataa sharaftiisii uu ku ahaa Mercurygii [dhambaalside] Sharma’arke si fiican loogu ma soorin, habeennadiisii iyo maalmihiisii daalka badnaana wuxuu ku idlaystay akhriska suuradda Y. S. [Yaasiin?] iyo tasbiixsi uu khayr ku ducaysanayo. Wuxuu sheegay in Garaadku siin lahaa neef ido ah gabdhihiisana uu mid ku sii meherin lahaae uu Shirwac ka dhabqiyay oo odayga sakhinnimadiisii u baasbaxay. ‘Inkaari kugu dhacday, midka cagaha dhiiqada leh ku wasakheeyay durdur xareed nadiifa ah!’ ayuu ku haaraantamay Yawmul Qiyaame.

Dabadeed, aqalkii qiiqa badnaa ayaannu hore u sii galnay. Garaadkii iyo wiilashiisii Wilensi ayay jireen oo ku soo xallinayeen hawl culus oo ka dhalatay safar qabiilka Udbayahan dhacay. Intii ay maqnaayeen ayay wanaagsantii Khayra iyo gabdhaheedii shaqadii martigelinta guteen oo bariis iyo dhowr digaagadood noo kariyeen. Habeen wanaagsan ayaannu ku idlaysannay ka sheekaysiga dhibihii na soo maray, sida dalmartu yeesho, iyo isugu tahniyadaynta ayaankeenna wacan.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Laba saac subaxii dambe, ayaannu Wilensi u kooraysannay. Markii aannu u soo dhowaannay degmada, dhammaan dadkii jidka marayay waxay sidii Irish na wayddiinayeen in aannu nahay kooxdii Amiirka Harar uu laayay.
Hamblyayn qaylo dheer ah iyo sawaxan farxadeed ayaa nala ku soo dhoweeyay. Cawar isaga farxad ayaa ka badatay, Shehrazade iyo Deenarzade iyagana labadaba qosol ayaa ka soo haray iyo wax xishood loo kala garan waayay. Alaabadeennii ayaan u tagnay, dabadeedna waxaannu ogaannay in Cawar uu aammin daacada ahaa. Daacadnimadiisa, labadii hablood ilaa goor dambe habeenkaa cunno ma siin. Markaa ayaa waxaa soo muuqday Garaadkii iyo labadiisii wiil oo buugtayadii sida. Odaga go’ qurxoon oo Xabashi midabbo badan leh ah ayaa loo dhiibay, aqalkana wuxuu ka baxay isaga oo inta xarragoota kan ugu xarrago badan ah. Haweenaydiisii qurxoonayd ee Sucdiya ahayd iyo wanaagsantii kalee khayra, waxaa looga farxiyay hadiyado isugu jira dhego Birmingnham waawayn ah, brooches[1], jijimo, maqasyo, irbado iyo dun. Habeenkaa, sida caadada ah, wuxuu ku soo gebageboobay waliimaysi wehel leh.

Toddobaad ayaannu Wilensi isbaanasho iyo jiscin urursi u joognay, runtiina weheliyeyaashaydu Harar waa ku soo caqdeen. Nin Soomaali ah ayaa magaalada loo diray oo la faray in uu dameer ku soo raro basal, tubaako, xawaashyo, qaafiriyo iyo Karanji[2] ay annaga lacag la’aantu naga hor joogsatay in aannu soo iibsanno. Waqtiga waxaan isku dhaafiyay in aan erayo Afka Harariga ka ururiyo Saciid Waal iyo gabyaa Cali oo ah Soomaali Harar wax ku bartay. Wuxuu ahaa nin bar yar oo madow, madax dheer, dhabar dheer, indho waawayn, sunniyo buurbuuran, san si qurxoon kor ugu taagan, iyo daaman culculus oo aan gar lagu ogayn leh. Wuxuu yiqiin afafka Carabiga, Oromada iyo Harariga. Sida uu u yaqaanno, waxaa ii suuragashay in aan dhib yari uga helo waxa badanaa ugu dhibka badan ee ah ka soo dhex saaridda afka isrogrogga naxwaha. Haddii aan erayadiisii adeegsado, waa ‘Gabyaa Gabyaa dhalay’. Wuxuu ku bannaanaa qaddarintii Horace[3] u qabay cabbitaanka maansayahanku jecelyihiin, tixdiisu marka ay jidadka naxwaha ka weecatana waxay u dhadhamaysay mid aad loogu cuskaday sanabada Cawaantu ay la xiriiriyaan Bacchus [Baakas / Baakshus][4] iyo Ceres [Siiriz][5]. Wuxuu kale oo ahaa waddani iyo Tyrtaeus[6]. Ma jirto qabiil tolkiisa Geri ku soo duulay oo aan cay aad u xumi ku raacin. Canaanta uu dhallinyarada dagaalyahannada ah

---

[1] Biinan lagu qurxiyay dhaldhalaal laftu dahab, qalin, maar, bir, dhoob iwm tahay oo badanaa labbiska xagga kore lagaga nabo, si ay isugu qabtaan meel loogu talagalay oo ay si fiican uga muuqdaan. – *Tarjume*
[2] Cunno (macmacaan Hindi), sida sambuusaha loo sameeyo se ka duwan qaabka oo noocyo badan leh. – *Tarjume*
[3] Quintus Horatius Flaccus, wuxuu ahaa gabyaa faraha looga gubtay oo Roomaankii hore ahaa. *Tarjume*
[4] Sanam sheeko-khayaaligii Girriiggii iyo Roomaankii hore lagu sheegay oo khamriga iyo marqaanka loo cuskan jiray. Magaca kale ee **Dionysus [Dhaayanasis]**-na waa la oran jiray. *Tarjume*.
[5] Sanamad kale oo iyana sheekooyinkii Roomaankii hore lagu sheegay. Waxay qaabbilsanayd beeraha iyo barwaaqada ka soo go’da. Waxaa waa dambe isna magacaa loo bixiyay meere cilin ah oo ah kan meertada qorraxda ugu dhow, wuxuu u dhaxeeya Mars iyo Jubitar. *Tarjume.*
[6] Gabyaa Giriiggii hore caan ka ahaa. *Tarjume.*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

ku dhigay si ay Gadaabursiga ku soo durkaya isaga dhiciyaanna waxaa loo marin jiray kuwa wax 'burburiya'. Isaga oo uu dhiirrigeliyay go' yiil oo uu lahaa ha lagu siiyo ayuu xaajiga gabay u tiriyay. Waxaan soo gudbinayaa tarjumaaddii hordhaca gabayga oo toos ah, in kasta oo aan ku baraarugsanahay xaqiiqada ah in xigashooyinkan oo kale laga xishoodo.

Waa horaannu gabay meel dhignay aniyo awgay e
Maantaanse doonayaa inaan dhab u mariyaaye
Ilaahii Cabdalla keenay maanta oo carrabka ii daayey
Waa wiil Quraysheed oo kuman fac soo joogay
Awdal buu maray Saaxil iyo magaalkii Adareede
Boqollaal maraakiib uu leeyahaa badaha meeraaya
Maankiisu [7]

Marka aanan gabayaa Cali ku hawllannayn, waxaan isku maaweelinayay in aan Saciid Waal oo aad uga murugaysan wiil uu dhalay oo garabka nabar xun lagaga muday niyada u qaboojiyo. Aniga oo ka wewersanaa in odaygu uu malaha ka niyad xumaa dhibaato dhaawaca ka timaadda, ayaan isku dayay in aan uga laabqaboojo. 'Bali, Xaaji!' ayuu ku calaacalay odaygii, 'taa ma aha! Sidee wiilku anigan toorray aan gaysto mooyee aan waligay la ii gaysan kii aan *dhalay* u yahay?' Wiilka singijiisa in laga shaafiyo laga la caal waa. Marar kale ayaannu madaxda qabiilooyinka isugu yeernay, si aan abtirsiinyahooda uga qorno. Tani waxay mar walba ku bilaabanaysay muuqaal piano, laakiin si degdeg ah ayay strepitoso[8] isugu rogaysay. Qabiil iyo jilib walbaa wuxuu rabaa in uu kaalinta koowaad galo oo midkoodna xataa tan labaad ma rabo. Haddaba maxaa la yeelaa? Marka xammaasaddu meesha ugu sarraysa gaadho, warqadda iyo qalinkaba gacantayda ayaa laga dhufsadaa, madaxyo gurmaaxan baa naxariis darro la isu jiidjiida, toorreeyahana galalkaa laga doontaa. Ha se ahaatee, murannadaas si fudud ayaa loo xalliyi jiray, mar walbana waxaa lagu dhaafi jiray xifaale badan, qosol, iyo caraatan.

Nasiinadii todobaadku markii ay dhammaatay, ayaa waxaa yimi Sheekh Jaamicii Bartire oo sita qalabakii safarka ee ahaa seef, masallihii haragga ahaa ee salaadda iyo buraashad biyood. Ninkan buurane barta yar oo ka hela in uu qof walba hawshiisa faraha la galo, waxaa la socday walaalki oo aan qof sidiisa u salaad badan ahayn, iyo afar wadaaddo madmadow oo buubuuran ah oo uu dhaladkooda, cilmigooda, ilaah ka baqooda iyo wanaagoodaba uu si wanaagsn uga hadlay. Casho bariid, subag iyo timir ah ayaan gurigayga ugu sameeyay oo si dirqi ah, xanuun darti, uga cudurdaartay Sarmad ama habeen cawayn iyo ku dikriga kitaab culus oo laga bilaabo fiidkii ilaa habeenka

[7] Tixdan tarjumadeeda oo tii labaad (qofkii saddexaad) maraysa waa isku day uun ee maaha sidii ay dhab ahaan u tiil. Haddii la garan lahaa xarafka uu gabyaagu ka gabyay waa sahlanaan lahayd in la dhaweeyo. *Tarjume.*

[8] Piano iyo strepitoso waa laba cod oo qalabka muusigga ka baxa. Kan hore waa mid debacsan kan dambana waa mid sare oo qaylo u dhow. *Tarjume*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

saacadihiisa dambe la waday. Shiikhu wuxuu ii sheegay in hawshiisa nabadgelyo ee uu markaa u socday ay ahayd Badawida deriska ah in uu mag u kala xukmiyo. Xaalku waa kii Soomaaliyeed uun. Nin ayaa mid kale daawo siiyay, kii daawada la siiayay ayaa bil dabadeed dhintay. Ninkii dhintay aabbihi ayaa dawoolihii ku eedeeyay in uu sumeeyay wiilkiisii, magtii dhaqanka ahaydna dalbaday. Saciid Waal ayaa erayo xushmad darro ah ku la ganuunacay walinimada wadaadadan naftoodii salaad iyo Qur'aan u go'doomiyay, halka Garaad Aadan uu madaxa xoqday, ka dib markii uu maqlay dhalleecayntii sheekhu la beegsaday fikirka Soomaalida ee ah 'rag ciil cadaab ka dooray!' si xifaale ahna u sheegay in maanta dib loo Muslimiyay.

Axaddii, Janawari 21, ayuu ninkii aannu dirsannay Harar ka soo laabtay, isaga oo jiscinkii sida. Eraybixintaydii aan qoranayay waa dhammeeyay, wax Wilensi nagu daahiya haddii ayan jirinna waxaan go'aamiyay in subaxa dambe la dhaqaaqo. Markii kutirikuteeni dibedda u baxay, dadkii degmada degganaa oo dhan ayaa aqalkayagii ku soo jabay, iyaga oo wax ay baryaan ama qaataan doonaya. Dhakso ayaan ku khasbanaanay in aan xirno guriga, amar na lagu sii bixiyay in cid aan Sheekh Jaamici ahayn la soo dayn. Wadaadkii wuxuu yimi isaga oo inta belo miyi taal ee aan daawada loo helini u dhanyihiin. Markii aan sheekadii magta dhegaystay ayaan gaaray in qardhaasyadu ay yihiin daawada ugu wanaagsan ugu na dhibka yare ee buuralaydan laga adeegsado. Sheekhu waxtarkooda ku ma qancin markii hore. Markiise aan ijaasadaydii suufiga sare la soo baxay ayaa waa cusubi ku beryay isagii iyo Wadaaddadii la socday ba. 'Allay lehe maantuu caddaystay!' ayaa mid walbaa kii ku xigay kula faqay, iyagoo weli fajacsan. Sheekh Jaamac ayaa inta si fiican shahaadadii u rogrogay oo kor ugu qaaday meel madaxiisa la siman wax duco ah akhriyay. Dabadeed tiraab dabacsan ayuu nuqul iyo aan 'Ijaaso' u gooyo iiga baryay. Codsiga hore si aan hakasho lahayn ayaa loo aqbalay, kan labaadse waxaan door biday in aan ka meermeero. Dabadeed, wuxuu isu qiray in uu xerowgayga yahay, abaalmarinta shaqadiisiina waxaa laga siiyay qalin iyo cimaamad xariir ah.

Maalintii ambabaxeennu ahaa ayaa soo gashay, ha se ahaatee qofna u ma ekayn in uu dhaqaaqayo maalintaa. Xammaali, oo habeen hore firfircooni iyo shaqo ka muuqatay, hadda dib ayuu u gurtay. Bun iyo sibraarro biyaysan toona noo ma diyaarsana, Deenarzade na waxay u baxday in ay degmo fog qulco ka soo iibsato. Tani waxay ahayd shaqo Afrikaan lagu yaqaan oo dhab ah. Lix iyo labaatan maalmoodi ku ma fillaan shaqo la qaban karay saacad qura! Wax shaqaale ah Garaadku noo ma diyaarin, in kasta oo uu boqol ballan qaaday marka loo baahdo. Guuleed Dheere si aan ka fiirsasho lahayn ayuu toorraydiisii u amaahiyay af miishaarkii Yuusuf Dheere ahaa oo markii uu bixidda maqlay durba ba dhuuntay. Daqiiqaddii ugu dambaysayna, Cabdi Ammaan, oo in uu horwade Berbera na geeya noo noqdo Harar nooga soo raacay toban doollar, wuxuu hadda sheegtay afariyotoban. In xoog la adeegsado in aan laga fursanayn ayaa halkaa ka caddaatay. Garaadkii ayaan u cid diray, bal mar uun in uu awrta keeno, Xammaalina waxaan amar ku siiyay in uu aqallada furfuro. Cabdi waxaa loo sheegay inuu Harar ama


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

meel kale qabto, Guuleed Dheere tooray kale ayaa Berbera loogu ballanqaaday, Deenarzade farriin ayaan u dhaafay in ay naga daba timaado, in la guurana waa la is faray. Qaylo iyo hadallo kulkulul dabadood ayuu safarkii saddex saac oo subaxnimo diyaar ku noqday. Iyada oo Garaad Aadan iyo raacdareebtiisii hargaantida ahaydi na hor kacayso ayaannu Wilensi dhanka bari kala laabannay, awrteennii aadka loo rararyna dirqi kaga degteen qarka adag ee ka degaandega waraqa ballaaran ee Wilensi ka gooya Bancawseedka Maraar. Todoba saac duhurkii ayuu garaadkii in aan joogsanno noogu baaqay, annaga oo aan dheg jalac u siin ayaan se sii dhaqaajinnay. Markan, Guuleed Dheere iyo Yawmul Qiyaame waa maqanyihiin oo amarkii dedegga ahaa inta jebsheen ayay laabteen oo toorraydii jariyeen. Si aan anshaxa kaladambaynta u sugo, markan ninka dheer ayaan madaxa, sida uu sheegtay, hubkiisa maqani wareeriyay, qarxin lahaa, dawadaasi se waxay u muuqatay mid cudurka ka liidata oo ma yeelin.

Aniga oo Xammaali oo qur ahi ila socdo ayaan rayrayn Bancawseedkii Maraar ku soo galay. Caalwaa' ayuu garaadkii nooga abhiyay in aannaan gelin meeshaa libaaxu ka buuxo, wuxuuna si aan laga siisan u ballanqaaday in uu neef ido ah ama dibi noo loogo. Dabadeed, halhaleel ayaannu inta ku dhaafnay awrtii kaxaynnay.

Banka dacalkiisa annagoo aayar la wareeganayna ayaa habsaamayaashii na soo gaareen, waxaan kale oo aragnay koox safarr ah oo sida caadada ah joogsaday, si ay noo waraystaan. Hoggaamiyaha oo baqal ku joogay, wuxuu noqday Madar Faarax, Soomaali Cadan aad looga yiqiin. Wuxuu yeelay in uu na weheliyo ilaa halka minqaadka xiga lagu nasto, wuxuuna aad u la yaabay sidii aan Harar kaga soo baxsannay. Wuxuu kale oo na siiyay xog hoose oo weheliyeyaashaydu aad u sugeen. Garaad Xirsigii Bartire oo uu Madar dadkiisa dhex degganaa ayaa waxa uu aad noogaga carooday waxa aan waddada toosan uga leexannay. Taa waxaa sii dheeraa, wuxuu war ku helay in aannu 600 oo dollar iyo alaabo kala duwan siinnay Garaad Aadan. Maxaa haddaba isaga loo qadiyay ayuu ku andacoonayaa? Madar wuxuu si la garan karo nagu la taliyay in aannu habeenka hore u sii guuraynno, kaynta oo laga yaabo in Midguhu ay leebabkoodii sumaysnaa adeegsadaanna iska jirno.

Waxaannu ku degnay degmo markii hore Gurays hoosteeda tiil oo hadda wax yar kuraha ka durugtay. Muggan waxaa soo muuqday Deenarzade oo ay dhinacyada ka lushaan qulco, carana cunaha joogta. Waxaa weheliyay Dahabo, geesigii Buux walaashi oo ay ninkii aan qummanayn, waa Garaadkiiye, inta is furneen rabta in ay nagu lug darsato oo gurigii reerkooda u socota. Dabadeed, waxaa yimi Yuusuf Dheere oo waji dhoollo caddaynaya iyo xariifnimo la soo galay, isaga oo toorridii sida, cudurdaar baddana ka bixinaya khaladkii dhacay. Waxaa weheliyay xayn rag reer tolki ah oo, sida caadada u ah, aanu Garaadkii ujeeddo wanaagsan la soo dirin. Ninkaa waxaa loo soo sheegay in qolada ay is hayaan ee Bartaire ay boqol neef dul dhigeen naftayada, nolol ama geeri. Gacanyareyaashaydii ayuu si beerlaxawsi ah ugu yiri, ‘war ma jeceshihiin xaajigiinna?’


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

oo hadda u raaciyay, haddii ay jawaabtu haa tahay, waa in ay xoogaa maryo ah siiyaan, marka la siiyaya uu konton fardoolay ah nagu jid marin doono.
Soomaalidaydii waxay ka dhureen war beentiisu meel mayl jirta ka soo urto. Dabadeed, in ay ka doodaan ayay u fariisteen xaaladdaa muhiimka ah, shirkaasina wuxuu qaatay saddex saacadood oo la isku go'ay. Anigu mar uun in aan dhaqaaqno ayaan soo jeediyay. Waxay ku doodeen in aan awrtu socon karin, qabowga bancawskuna uu dadka dilo. Safar ganacsato badar sidataa ay wadato oo wehelinteenna sugaya ayaan dabadeed in berri subax la dhaqaaqo ka la hadlay. Wali kuwii waa is adkeeyeen. Ugu dambayntii habeen ayaa galay. Aniga oo og in ay waqti lumis uun tahay in habeenkaa oo dhan laga doodo khataraha berri nagu fool leh ayaan timirtaydii cunay, caanahaygii dhamay oo dhinaca dhulka dhigay, si aan hurdo u ledo cidladaa aamusan.

Subaxii, Janawari 23, ayaan weheliyeyaashaydii arkay oo sidoodii walaacsan. Xammaali waxaa loo qaybshay inuu fasax u helo si uu Garaadka iyo raggiisii keeno. Taa si cad ayaa loogu gacansayray. Si ay ahaataba, waxay iga gayn wayday in aan dhawr go' siiyo doqonkii dhagarlowga ahaa, si aan ficil ugu xoojiyo codsigayaga jid marineed. Halkaa ayay Yuusud Dheere, Madar Faarax iyo raggii kale nooga tageen, iyaga oo ballanqaaday in ay ciidanka soo diri doonaan duhurka horti. Waxaan u jeeday iyagoo raynrayn ku tegay, oo dareensan in aan Geriga macasalaamaynnay. Khatarta ugu wayni waxay nooga imanaysay Garaad Aadan, taa oo ahayd xaqiiqo aanan ka war helin ilaa waqti dambe, ka dib markii aan Berbera ku soo noqday. Wuxuu mar walba qorshaynayay baad xoog ah oo haddii uu isku dayo naftiisa u qoonsan lahayd, se isla markaa annagana khatar daran na gelin lahayd. Duhurkii ayaa la gaaray, fardoolay se la ma hayo! Weheliyeyaashaydu waxay ballanqaadeen in hadii nala ku ballanfuro ay inta aan habeenku gelin dhaqaaqaan oo ilaa waaberiga socdaan. Markii awrtii la doonay, ayaa midi sidii negaadi lagu ballamay baxsaday. Waa ay raadiyeen, si sadcaalku waqti uu ku diyaar noqdo loo helo. Dabadeed, raggaygii ayaan si cad ugu sheegay in gabagabadii ay aniga iga go'antahay in aan kaligay berri Bancawska ka gudbayo, haddii lagama maarmaan ay noqoto.

Habeenkaa daruuro culus ayaa dhanka Kuraha Gurays ka soo rogmaday oo cirka mugdi madow ku deday. Markanna biriq daliig buluugan ah iyo onkod is wata oo sidii dakhsigii u kala didiyay duddo dad ah oo gurigayga hareerihhiisa foognaa ayaa dhacay. Roobkii wuxuu gurigayagii uga darroorary sidii aannu baastamiir hoos deggannahay. Deenarzade waxay sheegatay in aysan xanuun la kici karin, Shaharzade na waxay ku dhaaratay in aysan wax shaqo ah qabanaynin. War yaanan kugu daalin e, habeenkaa innaba wanaag lagu ma kala hoyan.

Waaberigii 24 ka, ayaannu u dhaqaaqnay in aannu Bancawseedka Maraar ka gudubno, annaga oo kolonyo ilaa labaatan rag ah iyo soddon dumar oo awr badar sidda, dameero iyo xoogaa ido ah wadata ah. Safkii dheeraa ee jiitamayay Xirsigii indhaha adkaa iyo Bartirehiisii dabkoodu ciirada subaxa nooga dhex muuqday 'waa ku dhici waayeen'. Hawadu waxay ahayd mid cakiran, cutubyo daruuro cukan ahna kuraha dushooda ayay


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

ku ekaadeen, halkaa oo ay qabow iyo dabaylo dhedaysani banka ku garaacayeen. Mararka qaar roob ayaa na qabta, marar kalena shuux aan u daahin in uu ka duso dharkayaga khafiifka ah. Dadkaygii waa jarceeyeen oo ilakaha isku garaaceen, sidii ay baraf dul lugaynayaan. Luuditaankeennii, waxaan sii dhex marnay raxanno dameerfarow iyo dabataag ah, xawayaanku se duurjoog ayuu ahaa oo ragga iyo baqluhuba ku ma aadin in ay raacdeeyaan. Abbaarihii kala barka maalinta ayaa waddadii soo xirantay, maxaa yeelay waddadu waxay dhex maraysay tog qurac badan, waana halka ugu habboon ee dhuljiif qaansoolay ahi gasho. Kooraha ayaan ku dul qadaynnay oo ku cunnay cadad waawayn oo kumbis geel ah iyo fudad xabag geedaha laga soo guray ah.
Haddaannu ugu dambayn bancawskii ka gudubnay shil la'aan, saffaraydii waa na gacanqaadeen, isu hambalyeeyeen, ku na dhawaaqeen in aan naftooda badbaadinnay. Qorraxdhacacii saacad ka dib ayaannu gurigii Abtidoon nimi, xero wayn oo buurta dhuuban ee Konti hoosteeda ku yaal. Cabsi libaax laga qabay darteed ayaa dadkaygii xayndaabka ku xaraysay, halkaa oo aan habeenkii xoqxoqasho badan isku dhaafinnay. Waxaa markan faro kulul igu hayay xanuun sulphur [muqlo?] lagu sheegay. Kani waa xanuunka Carriga Somaaliyeed ee gudaha xiga [dhanka xeebta marka laga tago]. Dadku waxay sheegaan in dakhsiga iyo dhiglaha laga qaado, Yurubiyaanku se wuxuu u aanaayaa mayrasho la'aanta, ama aan iraahdee suuragal la'aanta mayrasho.

'Allow Socotada kaalmee, naftu iyadaa ba iska socota e'. Oraahdaa ayaa Yawmul Qiyaame afkiisa ka dhammaan wayday. Sidaa oo ay tahay, sida muuqatay, xaalkaygu waa ba ka sii duwaanaa . Janawari 25, waxaa na habsaamiyay tabardarrada awrtii oo buuraha Geri aan baad badan ka soo cunin.

Markii aannu u soo dhawayn carriga Habar Awal[9] oo waagaa aano dhiig kala dhex tiil raggayga oo dhammaan Garxajis ahaa, malahana toddobaad ayay nagu qadaan lahayd ka hor inta aan abbaan habboon oo adag helaynno. Horeba waxaa la i daahiyay toban beri waqtigii la qabtay, jaallayaashaydii Berbera shil dhaca calool uma ayan hayn, in kasta oo aan Wilensi ka soo baxnay se waxaannu isla goosannay in aannu xeebta ku gaarno laba todobaad. Sidaa awgeed, socod bil ah shaki la'aan waa la filayay.

[9] Waa faraca labaad, sida Soomaalidu u kala baxdo. Odayga qabiilku ka soo jeedaa waa Awal, ina Isxaaq Al-Xadrami. Habar Awashu waxay degtaa xeebta Saylac iyo Siyaaro ilaa dhulka Bartire xudduudda la leh. Waxay hoos tagaan xukunka Garaad awoodda uu leeyahay ay maamuus uun tahay. Garaadkii ugu dambeeyay oo afar sano ka hor dhintay waxaa la oran jiray 'Boon', se wiilashiisii weli la ma duubin. Jilibka garaadku waa Cayaal Cabdillaahi, jilib xoog badan oo Buuraha Dabasanis ilaa Jigjiga agteeda taxan, Bancawska Maraareedna dacalka kala wareegta. Habar Awashu waxay u kala baxdaa lafo tiro badan; kuwaa mid ayaan ka tilmaami doonaa. Waa Soomaalida xeebta ee dadkeennu awal ba yiqiin. Ciise Muusuhu wuxuu degaa qayb ka mid ah Buuraha Berbera koofurta ka xiga. Mikaahiilku waxay degaan dhulka hoose ee xeebta Berbera ilaa Siyaaro. Laba lafood oo waawayn, Cayaal Yoonis iyo Cayaal Axmad, waxay degeen Berbera iyo Buulaxaar. Kuwaa marka laga tago, waxaa jira Cayaal Cabdillaahi Sacad, Cayaal Jircato oo Cayaal Yooniska dhex dega, Bah Goba iyo Cayaal Xaamid. – *Burton*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Anigoo fikir xaaladdu igu ciirsanthay, meel aanu fikir waxba qaban, ayaa si lamafilaan ah waxaa u yimi ninkarmeedkii Buux ahaa oo walaashi Dahabo jalaqsan ay noo soo dirtay. Wuxuu noo sheegay in Abbaan uu degmada joogo, warkaasina fikrad ayuu igu dhaliyay. Waxaan soo jeediyay in uu Saylac u sii kaxeeyo awrta, dumarka iyo alaabada oo uu Cawar hoggaaminayo, halka annaga oo fuushan gammaankeennii, sidannana hubkeennii iyo saad afar maalmood ku filan aannu carri Habar Awal sii dhex marno. Xoogaa isjiijiid ah dabadeed, dhammaan arrintii waa la isla oggolaaday. Aniga oo ka masuugaya ayaan saadkaygii oo dhan; shan xabbo oo buskud ah, dhowr xabbo oo liin ah iyo fudad sonkor ah jeebka ku shubtay. Wax dibudhac ahi haddii uu gaadiidkeenna ku yimaado hubaal waa caqanaynaa. Waa tan hore e, waxaannu sii dhex maraynnay agabbar qarfe ah. Tan labaadna, Habar Awal meel ay degto hilib iyo caano midna ka iibin mayaan Habar Garxajis. Sidaa awgeed, gacanyareyaashaydii waxay qaateen saad yar oo hilib areerin ah, badar, iyo macmacaan isugu jira. Hal haan oo biyo ah ayaa kooxda oo dhan ka dhexaysay.

Janawari 26, ayaannu habeen la qoyay dabadii waaberigii kacnay, se ilaa hal saac oo subaxnimo ma aannu dhaqaaqin. Sababtu waxay ahayd, kooxdii oo dhan Cawar, Shehrazade iyo Deenarzade waxay wada sheegteen in ay mid ba taladiisa ama taladeeda gaarka ah qaadanayaan. Markii aannu saaxiibbadeen iyo alaabadii ka tagnay[10] ayaannu gammaankii ciribta ku sii dhufannay oo annaga oo Buux na hor kacayo ceeryaamo iyo daruuro dhexdood xagga Kooralay u kooraysannay. Saacad qar dhagaxyo tuuranyihiin dushii an ku ruclaynnay dabadeed, Togga Harawo ayaannu ku soo dhacnay. Waxaannu ku soo baxnay degmo Gadaabursi ah oo ay wehelladaydii ku hakadeen, si ay u waraystaan, calooshana caano uga kiistaan. Halkaa ayaannu aayar uga sii soconnay, sida waddada oo goog’anaydi na badday, oo sii dhexmarnay xirmooyin xinneduur ah ilaa aannu ku tagnay xayndaabkii uu degganaa Buux reerkiisu. Meel dheer ayaa waxaa naga aqooday oday aannu hore isu niqiin oo Faahi[ye] la yiraahdo. Wuxuu isla markiiba bilaabay in uu ciyaar boodboodo, sidii Polyphemus[11] yar, isaga oo tuurka timihiisu hawada babbanayo. Caano dhamid badan ayaa mar kale habsaamisay wehelladaydii oo hadda afar maalmood jiscinkood urursanaya.

Minqaad kale ayaannu dib inta u kooraysannay safarkeennii ku sii wadannay qar iyo jiq isku dhafan, gammaankeennii ka waraabsannay ceelal Dix ah, oo uga sii gudubnay degmo uu deggenyahay Ugaaska qabiilka Gadabuursi. Wuxuu ahaa nin da’diisu

---

[10] Alaabadaydii laba bilood ka dib ayay Cadan soo gaadhay. Baqalkii Cawar looga soo tegay la ma arag, awrtiina waxaan u malaynayaa in ay weli Ciise dhex daaqayaan. Sheherezade dii casayd markii ay xoogaa xoolo ah urursatay ayay nafteeda wax ka beddeshay, Deenarzade na markeeda ayay ku dayatay. Cawar markii uu Cadan yimi dabadeed ayuu laabtay, si uu saaxiibbadiisii Saylac sheekooyin yaab leh oo dhaadheer oo dalmar ku saabsan uga dharjiyo. – *Burton*

[11] Polyphemus (Boolifimas) waa mid ka mid ahaa dad sheekabaralaydii Giriig-Roomaankii hore lagu sheego oo Cyclopes [Saykaloobis] la yiraahdo, wajiga bartankiinsa ayay, sida la yiri, il qur ah ku lahaayeen dadkani. – *Tarjume*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

dhexdhexaad tahay oo iska caadi ah, ma na uusan seegin in uu gacanta u soo taagto hadiyad uu iska qaban waaway. Qiyaasta saacad barkeed markii aannu nassannay, ayaannu jidmariye qalqaalsannay oo ku la heshiinnay in aannu shan doollar iyo laba maryood siinno, si uu noo weheliyo. 'Dubayr' [?] oo Bah Gobada Habar Awal ka dhashay wuxuu ahaa 'xayaysi dheer' oo sida badawida oo dhan aan daal u adkaysan karin. Fardafuulka ma uu aqoon, kooruhu waa gooyay, baqalkiisiina waa u dhaqaaqi waayay. Dhowaan ayuu guursaday, socodka ma karin, harraad ba'anna waa uu ka sheeganayay. Dubayr wax wayn ka ma ogayn xilka uu dhabarka u ritay, markii uu ballanqaaday in uu Berbera na tuso maalinta saddexaaad. Minqaadkii labaad ayaa ka dib ballanqaad hadiyad wayn iyo cunto joogto ag lagu qalqaaliyay in uu sii socdo. Mararka qaar dhererkiisa ayuu dhulka is bilqiyay, isaga oo ku cataabaya in ay imminka tiisii gashay. Nin la arkaba warankiisu waa noo col dhulka aan doonayno in aannu sii dhex marno. Sidaa awgeed, feejignaan ahaan ayaanu amar ku siinnay in abbaannayadu ay na marshaan jidadka cidlada ah, si feejiganna ay uga fogaadaan degmooyin oo dhan. Markii hore, isaga oo aan garan ulajeeddadeenna, mar walbana ay caano kaga dheggantahay, xero oodan ma uu dhaafi karin isaga oo aan il quuddarro ku godin. Maalintii xigtay, si ay ahaataba, qof lala shqayn karo ayuu noqday, intii aan Berbera la gaarinna wuxuu noqday mid xataa annagii nagaga tugtug roon ka fogaanta degmooyinka, aano hore oo tiil darteed.

Dubayr amarkiisa ayaannu mar kale dib ugu kooraysannay oo socodkeennii xaga bari u sii wadannay. Markan, Soomaalinnimo xataa waa uu ku war badnaa, wuxuuna bilaabay in uu jidka dhankiisa midig ka tilmaamo burburka dhisme dhagax ah oo, sida dhulalkan caadada ka ah, lagu magacaabo qalcad. Shishadeeda waxaannu ugu tagnay degmo ay dhammaan dadkii degganaa qaylo baryootan tubaako ah ka wareegeen. Sagaal saac oo galabnimo ayaannu nimi Dix ballaaran oo ay jiq geedo isku maran ahi cabburisay. Waxaa nala tusay ceelal Gaalo hore lahayd oo la yaab leh, waa godad dhaadheer oo ilaa labaatan gacood dhexroorku yahay oo dhagx  laga qoday. Qaar waa gureen, kuwo kale na waxaa ku baxay geedsaar. Mid kaliya ayaa biyo rooni ku jireen. Qabiilka Gadaabursi ayaa ceelashan Geriga mag uga qaatay. Markii ceelashan la dhaafo, dhulka waxaa dega Reer Yoonis Jibril, jilib xoog badan oo Habar Awal ah, buurahana waxaa ku teedsan xayndaab iyo xero ood xanan ah leh. Annaga oo aan salaanta ka celin badawiyiin si ku dheeraysi leh nooga dalbaday in aannu joogsanno oo u warrano ayaannu hore u sii rucaynnay, annaga oo raadinayna xero cidlo ah. Qorax soo baxii dambe ayaannu marnay muuqaal wayn oo dhankeena bidix ah. Waa burburka degmo waa hore ahayd oo loogu magac daray Wali degi jiray halkaa oo Aw Barhi [Aw Barre] la oran jiray. Buurta labadeeda dhinac waxaa dhaca dhul bancaws ah oo neecawda galbeedi basali qurxoon ka yeeshay. Soddoniyoshan mayl markii aannu sii fuushanayn, ayaannu nimi xero wayn  oo markii aannu ooddii gudaha ahayd qaadnay caws cusub uga helnay gammaankeenna caqday.
Habeenku wuxuu ahaa mid carcartiisii qaba oo dabayli dhacayso, uumibiyood adagina wuxuu isu rogay dhado dhibcaysa oo aan oon naga bi'in se si fudud heeryadii oo sariir noo ahayd ku qoysay. Si haddii loo eego, cimmilada darani waa noo roonayd.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Raadkayaga waxaa si fudud u soo raaci karay wiil walboo boolidoon Yoonis Jibriil ah. Kaymahaa geedqodxeedka lihi waa meelaha loogu jecelyahay dhicidda xoolaha. Taa waxaa sii dheerayd, habeenkii oo dhan dabka la ma damin. Sidaa oo ay tahay, baqalahayagii la ma xadin. Maalintii Janawari 27 ahayd, ayaannu waaberiga horti hurdadii ka boodnay. Halkii aannu ku nasannay agteeda ayaan ku arkay mid ka mid ah taallooyinka dhagaxa ah ee goonida u go'an ee dhulka Soomaaliyeed ku badan. Daraf ayaa dhadhaab wayn oo ilig mici ah la moodo kor uga taaganyahay. Dubayr wuxuu sheegay in dusha sare uu wali ka muuqdo raad dhisme waa hore ahaa, wuxuuna ka sheekeeyay sheekaxariirtadii laga marshay Moga Madir [?]. Halkaa, waxaa waa sii horraysay deggenaa haweeney Gaalo ah oo isheedu meel shan maalmood loo socdo colka burcadda ka arki jirtay. Qabiilada cadawgeedii ayaa, ka dib markii ay jabab badan oo calculus la kulmeen, weerar ku habboon soo qaaday. Ma ahan iyagoo labbisan e xirmooyin caws ah ayay madaxyada ku soo duubteen. Markii inantii Moga ahayd aabbaheed iyo ciddeedii la socodsiisay in bancawsku uu buuraha ku sii siqayo ayay waalli ku xukumeen. Xeeladdii waa lagu guulaystay, indhadheertiina iyada oo ciishaysan ayay sidaa nafteedii ku wayday. Sheekaxariirtu waxay igu xiiso gelisay sida ay u baahday. Taariikhdii Sarqa, qumayadii indhaha buluugnayd ee Jaadis ee Yamaama ku qabsatay sixirkeeda iyo sheekadii reer Scot-keenna laga yaqaan ee socodkii kaynta Birnam waa laba sheeko oo isku mid ka ah Aasiya iyo Yurub oo u dhigma 'Iliggii Moga' da Afrika.

Hal saac oo habbeennimo ayaannu uumibiyoodkii ceeryaamada ku dhaqaajinnay oo xagga bari u ruclaynnay, annaga oo ceel biyood raadinayna. Hagihii waa na khatalay. Maalintii hore wuxuu ballanqaaday biyo nus mayl walba oo la socdo loogu tago, dabadeed wuxuu calaacal ku sheegay in aannaan biyo cabbayn habeennimada ka hor. Dadkani waxay u muuqdaan kuwo beenta aan lagu dirqin oo dabeecadda beenlownimadu ay caado u noqotay. Way ku khayaanayaan, iyaga oo aan dhagar ula jeedin, sida kaliya ee war sax ah looga heli karaana waa in aad warsato, jawaabta hesho, oo aad hubiso in ay xaqiiqada waafaqsantahay iyo in kale.

Kugu luggoyn maayo, gacaliye L[umsdenow], qeexidda iskujoogga iyo muuqaalka aan xiisaha lahayn ee dhulka aannu soo marnay. Waa buuro cillan oo dushooda geedo xaskul dhadday ahi warmahoodii la baxeen, bannaanno sida muuqata dhagxaan roobka looga dhigay, dhul bannaan islabarogaya ah ayna ka buuxdo qodax miiran oo loo abuuray uun in ay qofka dubkiisa iyo dharkiisa jeexdo sidii 'wax yar sug'[12] tii carri Kaafir.[13]

[12] Karkey dey [maradayda sii daa]. – *Tarjume*

[13] Kaafir waa eray meelo badan kaga qoran buuggaan. Asal ahaan waa Carabi macnahiisu yahay qof aan diin lahayn ama aan Muslim ahayn, gumaysigii reer Yurub se wuxuu u adeegsan jiray Afrikaanka madow, siiba dadkii ay ugu yimaadeen dalka Koofur Africa. – *Tarjume*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Dhibkeennii waxaa sii labanlaabay cabsida sadcaalayaasha reer Bari, jinkii Harraadka ayaa sidii walwal noo daba galay. Afariyolabaatan saacadood ayaannaan biyo dhadhamin, ciriddu maskaxahay naga dubanaysay, dhaandabagaalluhu leexad walba waa na mihiyay, saamaynta ay nagu yeelatay taasina waxay ahayd nooc dhadhab naga dhigay. Haddii aan sii jafleeyay oo anigoo indho damuuqsan dabaysha afka saaray, wax hummaag ah oo aan rabiddayda biyood la xiriirini is ma kay tusin. Biyo ayaa uun i hor socda. Biyo ceel dheer oo harac qabow ah ku jira, biyo durdur ah oo iyagoo baraf ah qar ka burqanaya iyo biyo xareed harooyin xarfanaya ah oo in aan ku dabaasho oo barwaaqadooda aayar isaga bururo igu soo dhowaynaya ayaa uun ii muuqda. Muggan daruur Hindi ayaa dhibic luul la dhalaaliyay ka qiimo badan i saartay, dabadeed na gacan aan loo jeedin ayaa ii dhiibtay baaquli ay naftu si rayn leh sannado sii nolilaan ah u siisan lahayd. Dabadeed, kaaf iyo kala dheeri! Mar qura ayaan indhaha ku kala qaaday ban hanfi ka soo sunsumayo iyo cir buluugga qurxoon ee aan caadka lahayn ee farshaxanka wax asla iyo gabayaagu jecelyihiin, annaga bangeeriyaad-lamoodka noo ah. χαλου[14]-diisa marka la eego u ekaa mid kicinsan, dabayl roob wadata iyo sagal aad u ballaaran oo midabkiisu basali yahayna la yimid. In aan hadlo ayaan damcay, waa se k*ari* waayay. In aan heeso kari waayay, fikir kari waayay; fikrad walbaa waxay ku soo ururtay hal wax uun, biyo.[15]

Cadceeddii marka ay Bari ku libidhay ayaannu u soo degnay dooxada Gogaysa. Muuqaal aan laga sheekayn karin ayaannu meel dheer jaan gacaaran ka aragnay. Xoolaheennii meel fog ayay raxmadda ka carfiyeen, dhegahoodii raaracay ayay taageen, waxayna bilaabeen in ay nala rucleeyaan, ilaa i aannu leexad ka aragnay laasas yaryar oo badan. Koorakaboodka, la tartanka gammaankayagii oo xataa aan hadda ka baqayn muquusta qawlallada ku diisantay, naftayada dac ku tuuridda, qurqura aayar ku jiidka iyo wajiyadii gubanayay biyo ku sayrsayridda, intu ba waxay qaadatay wax ka yar in la xasuusto. Haddii miyir loo eegay, taxaddar ayay doontay. Dushu waxaa aad u sabbaynayay lullumo iyo cayayaan. Xikmadi markan xoog badan ma lehe, waa cabnay, oo cabnay, oo cabnay, oo haddana cabnay. Haddii gammaankayagii cawskii jeel afka dareen, waxaan soo jeediyay in aannu saacado yar ceelka agtiisa joogno. Weheliyeyaashaydiise baqdintii la yiqiin ee libaaxa ayay la cataabeen oo jabad laga guuray oo buur deriskeenna ah dusheeda ku yaal noo kaxeeyeen. Qiyaastii soddon mayl ayaannu xagga bari u soo soconnay, waxaana soo galnay dhul nabad ah oo ay degaan qolada Bah Goba oo hagahayagu ka dhashay. Qorrax soo baxii, Janawari 28, Dameer oo cagihii markan socod gabeen ayaa la fuuliyay, isaga oo sheegaya in ninka cad uu inkaar durriyadda Isaaq cirka looga soo tuuray yahay. Buraashaddii marka aannu biyaysannay ayaannu dhaqaaqnay oo

[14] Χαλου = halo (haalo), af Giriig. Waa muuqaal habka qaansaroobaadda u eg se goobaaban midabbo iyo qaabab kala duwanna yeesha. Badanaa, waxaa abuurmaa qorraxda oo ilayskeedu ka duso daruuro wiriqo qabow ah oo ka soke mara. Tarjume

[15] Sida xeerka ah, labiyotoban saacadood oo oommane qorrax kululi wehelisoah nin waa dishaa. Aniga waligay harraad sidaa u darani i ma helin. Markan se, sida ay u badantahay, waxaa isu kay helay oommanahaa iyo caafimaad xumo. – *Burton*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

dooxda Gogaysa hoos ula degennay. Baqalaheennii qoobabka ayaa xanuunay, koorayaashuna waa jareen. Sidaa darteed, waxaan ku khasbanaannay jirdil kale oo ah in aan sidii xaaxeeyadii ugu luudno kuraha daran iyo kaynta aan loo bogin.

Abbaarihii duhurka ayaannu soo gaarnay Waadi Dhanaane, waraq dheer oo dhagax dhexdi ah. Dhexdu waa biyo mareen dhubban oo cammuud meel meel caws dhaadheer ku leh, nus mayl walbana biyo badan oo macaan laga helo. Gebiyadu waa qar adag oo qoto dheeryihiin, kaynta qodaxlayda ah ee hareeraha kaga taalna waxay u yeeshay muuqaal duureed. Xayawaanno raadadkood, sida quagga[16] iyo cawl, ayaa meel walba yaacsayay. Aniga se oo aan marka 'kaftan Dianic[17]' i hayn, badawidana doonayn in aan ogaysiiyo meesha aan joogno, ayaanan xabbad juc ka siin. Waa sii soconnay, geedo waawayn oo dhowaan la diiray iyo dhir jilicsan oo kale oo la rujiyay ayaa muujiynayay in meesha mar aan fogayn ay raxan maroodi ahi martay. Baqalkaygii, in kasta oo uu gammaanka ugu geesisanaa, argagax ayaa u dhammaa. Shimbirmalabta yar ee ciirada leh ayaa iyaduna xeeladdeedii oo dhan la soo baxday, si ay noogu jeediso in aan habownno. Markan geedka ugu dhow ayay dul fariisatay oo kala jiririq leedahay casumaaddeedii barwaaqada, dabadeed duulimaadyo gaagaaban oo hore iyo gadaal ah ayay nala hor haadaa, si ay jidka noogu tilmaanto. Ciidankaygii se, in kasta oo uu carrabkkodu jacayl malab hidde u leeyahay, ma ayan raacin [shimbirtii], iyaga oo garowsaday in markan danta ay casumaadda ka leedahay aysan wanaag qumman ahayn ee wax kale jiraan.

Toggii haddaanu ka soo baxnay, xoolaheennii ayaannu ku tirtirsiinnay dhul marka si loo eego siman, annaga oo rajo iska hungo ah ka qabna in aan habeenkaa badda mar uun aragno. Haddaanu sii soconnay, dhirtii waxay noqotay dhif, dhulkiina sibsib. Meel meel wadiiqadu waxay maraysay dhagaxbireed maardhac u eg dushi. Meelo kale ciiddu waxay lahayd carraguduud lo'du leefto, iyada oo sida ay u badantahay maaddada birta ah ee ku dhafan ka raadinaysa. Dhulka meel walba waxaa gubay qorraxda daran, roob la'aanna waa la basaasanaa. Galabihii ayaannu soo galnay hoobad ballaaran oo Soomaalidu ku magacawdo Dix Maroodi ama Maroodiley. Ballaceedda markii aannu ka galbeed bari u jaraynay waxaannu sii marnay laba Dixood. Tan soke waa 'Xamar' [ama Xammur], tan shishena waa 'Laas Dhuurre.'

Muuqaalka waa isaga ekaayeen. Waadiga caadiga ahi waa 100 yaardi ballaca, ciid dahabi ah oo uu dhinacyada leek [?]doog ahi kaga teedsanyahay, ceelal guray oo ay dhinacyada ka yaallaan taalloyin qodxo durrujaa ah, raxan cawl ahina si xarrago leh ay gogosha dhagaxbaruurka ah u dul laafyoonayso.

---

[16] Nooc dameerfarow ah oo waayo hore cirib go'ay. Qaarka hore daliigaha dameer farowga lagu yaqaan ayuu ku lahaa, inta dhexe daliigahaa oo khafiif ah ayuu ku lahaa, qaarka dambana dameerka caadiga ayuu uga ekaa. Farowgani waxaa lagu yiqiin oo ku dambeeyay dalka Koofur Afrika, waxaa dhici karta in Burton dameerfarowga Geeska Africa ee caadiga ah uu ka wado ama Gumburi Soomaaliga. – *Tarjume*

[17] Kaftan cawaaneed. Tarjume


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Toggii marka aannu gar ka gar uga baxnay, ayaannu bilownay in aannu degaandegyada dhul daaq sare oo dhinacyadiisu ay sidii daah ugu samasymeen musduleedkiisa hoo u la deganno. Kani waa bilowga dhulka hoos ee Xatabka foorara ah ee ay tahay in annu ka deganno, inta aannaan badda indhaha saarin. Daruuro qabow ciiro leh ah oo siman ayaa dusha sare ee sida miiska u samaysan ka soo rogmay. Markaan waxaa na qariyay uumi ceeryaamo qabow qoyan ah, haddii aannu sii soconnayna roob ayaa  bilowday. Iftiinkii maalintu haddii uu sii libdhay, mar kale ayaannu u degennay dix salku dhagax marmaroorsan yahay, taa oo ah biyashubka ugu wayn ee buurta xagga dhulka hoose uga shuba. Weheliyeyaashaydii oo hadda caq ku dhow, waxay saddex maalmood ku noolaayeen sacab timir ah iyo macmacaan si kal iyo laab ah loogu liqay miraha gob duureedka dhagxaanta dhex daadsan. Hagihii ayaa markaa naga sii hor maray, mugii aan soo gaarnayna waxaa loogu yimi isaga oo fadhiya gebi caws leh  oo ku yaal darafta biyamareen qar ah. Farxad yaabiso leh ayaannu dabadeed kooraha kaga boodnay. Waxaa aad looga walwalsanaa iyadoo loo toog hayay in gammaankayaga oo midkood markii horeba katiga waranka lagu waday ay habeen kale oo gaajo ah nagu dhaafaan, sidaana aan rarkoodii dushayada ugu qaadno. Waxii meesha ka jiray ayaa dhakhso  isu muujiyay. Dhagaxa waxaa ku yiil hog ilaa laba cagood ballaca dhan oo halkaa qarka dixda ee dushiisa ah inta dahaarwiriqo ka sameeystay rah iyo lullumo janno u noqday. ‘Gacangal’kan waxay Soomaalidu u taqaannaa ‘ceel-dabagaalle’. Si ay ahaataba, waxa Dubayr iiga sheegi karay oo dhammi waxay ahaayeen in marka reer guuraagu togga soo degno ay biyuhu dhulka hoos ugu degaan, mucjiso sida aan u maleeyay aan laga gun gaari karin, Alle oo furfura mooyee. Isla sheekadaasi waxay sheegtay in waxani ay Carab ‘waa hore’ ahayd ka dambaysay.

Baqalihii cawskii daribta ahaa ayay si hamuungorgor leh afka u dareen, annaguna casho tii ugu bakhaylsanayd ayaannu u karsannay in aannu habeenka roobabawga ah isku dhaafinno. Hase ahaatee, markan qoollayda iyo Katas[18] oo ah shimbirta kaliya ee dhulkan biyo u baahata ayaa noo soo dhowaaday, iyaga oo ka baqaya in ay cabbaanna ci’ iyo qaylo dheer nala dul duulduulay. Weheliyeyaashaydii waxaa u muuqday in ay suurogal tahay imaanshaa bahallo waawayn oo xooggan, iyo xataa dad biyaha soo raaca.

Nasasho gaaban dabadeed, horusocod ayaa lagu baaqay, kanuna wuxuu ahaa baaq aanan mabd’ ahaan waligay diidin. Baqalaheennii oo hadda kifaaxay niyadduna u dhisantahay ayaannu dib u kooraysannay, si aannu u tafno afka hore ee dhagaxa ah ee kurta Bari, annaga oo ceeryaamo dhedo ah oo gudcurka culus sii madoobeysay sii dhex marnay. Haddii aannu dusha qabowga badan u baxnay, roob culus ayaa weheliyeyaashaydii marmarsiiyo ay ku degaan siiyay. Waxay heleen xero jabad iska diyaar laga guuray ahayd oo aan habeenkii u hoyannay. Maalintaa waxaannu soconnay ugu yaraan 35 mayl, annaga oo aan intaa qof dhaqaaqa arag. Dhulku waa wada gubad biyo la’aan la gamaaray, reer guuraagii oo dhanna waxay u guureen xagga bananka.

[18] Waa *sand-grouse* kii  Masar, ama  *rock pigeon* kii Hindiya iyo agagaarkeeda lagu yiqiin. – *Burton*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Subaxii Janawari 29, si aan looga baran ayuu u wacnaa. Roobkii habeen hore da'ay ayaa ceeryaamo dhedo xoog leh ku reebay buuraha iyo dhinacyadooda, uumibaxa dedegga ahina ilqabadka musduleedka ee aan caadka lahayn ayuu midab buluug culus ka yeelay. Maalintii waxaan ku bilownay kor u fuulidda wadiiqo ari oo taag sare ah. Waxay ku soo dhacday dix cammuud leh oo ay ku baxeen Gob iyo geed qodaxeedyo kale. Meeshu biyo badan ayay lahayd, dhinacyada dhagaxa ahna waxaa ka muuqday gebiyo ku bannaan kii Qoomkii kahfiga.[19] Wadiiqadeennii haddaanu tog dhagax leh oo u dhaxeeya kurta labadeeda gaw ee is garab yaalla sii raacnay, waxaannu abbaarihii afar saac oo subaxnimo ku hakannay jaan dhulcawsaad roobkii beryo la soo dhaafay bacriminyay kurta dusheeda uu soo saaray. Intii ay daabbadaheennii cawska boobayeen ayaannu geed hoos fariisannay oo xagga hoostayada fog ah ka aragnay dhulka hoose ee Hoobadyada iyo badda kala qaybiya. Toobiyeyaal sagallo rogmaya u eg waxaan ka arki karnay marinnada dhaadheer ee dixaha meel ka hoosaysa waran. Afar saac oo subaxnimo, wax yar ka dib, ayaannu socodkeennii sii wadannay oo bilownay ka hoobashada gebi uu haguhu ku sheegay magaca 'Kadar' [Khadar] oo aan kaga sii daadegnay hoobadkii.

Biyamareen cammuud ahi ma jiro e 'Jar'ka dhulkan cawaaneed ayaa sadcaalayaashu adeegsadaan. Hoobabka daadegga ah ee kurta ayaa waxaa ku yaal tuurar is xiga oo dhadhaabbo midba mid jaranjaro aan qaabaysnayn loo dul saaray yahay, sida ka muuqatana aan suurogal u ahayn rati rarani in uu maro. Gebiga oo ah Splugen[20]-ka Carriga Soomaaliyeed ayaa markaannu saacad sii fuushanayn nagu riday Waadiga Duntu, faruur-buureed ay sameeyeen lisanka roobabka mahiigaanka ahi. Waraqaa ayaa durba ba sii dhex xula laba gebi oo ugbaad leh oo *syenite* iyo dhagaxdixeed basali ah oo *mica* fulfullaacsan la dhalaalaya, daliigo moosas ah iyo durdurro yar yar oo dhagaxbaruur bayl cad ahna leh. Mardimaha dhaaracyada dhagaxciideedku xagga iyo xaggoo sagxadda ugu soo kudsani si la yaab leh ayay bu' dhexe ugu marmarnaayeen, sida laamaha saaqa cagaarani geedka isugu maraan. Xagga sare fiiqaqa kuraha ayaa hawada sare dhex liqdaaran, xaggan kale dabaylaha culus ayaa ciiddii geeduhu ku bixi jireen ka xayuubisay, xaggoo kalena geedo xabageed ugbaadkooda loo bogo ayaa cagta buurta ilaa fiiqa daboolay. Khuurigu markan ciid ayuu lahaa, waxaa na ku goglan dhagaxnuuradeed sagxado lagu simbirixdo leh, meelaha qaarkoodna waxaa qabsaday dhadhaabyo. Mar mar dhabbuhu waa bannaan fudayd lagu mari karo, marar kalena waa hoobad dheer oo labaatan ilaa soddon cagood dherer la'eg ah oo roobka dabadi biyadhac yar noqda. Kuwaa ayaa nagu qasbay in aannu marinkayaga sii dhex xoogsanno qodxaha macangagga ah ee aad mooddo in ay difaacayayaan taag kur dhagax leh ah. Haddii kulkii duhurka ee ku soo ururay carrigan dubaaladda ah uu dad iyo duunyaba saameeyay, waxannu helnay hul looxdixeed hoostiisu haraca tahay oo biyo xareed ah oo ciidda ka

[19] Kahfi (cave) waa hul la galo oo buuraha gebiyadooda ka samaysma ama laga qodo, dad iyo duunyaba duggaal u galaan, sida gebigii ay galeen Asxaabul Kahfiga Qur'aanku sheegay *Tarjume.*
[20] Marin meermeer qalqalloocan ah oo Buuraha Alps la yiraahdo ee Swissra iyo Talyaaniga u dhexeeya isaga gudba, dhulka uu maraana aad u qurxoonyahay. *Tarjume.*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

soo burqanayaa ay balli dabiici ah ka sameeyeen. Halkaa ayaan fariistay, si aan uga isha bogto qurxuda iyo cimmilada ay sida meelo ka mid ah Beershiya iyo Waqooyiga Caraabiya dhulka agabbarka ahu udgiyeen geedaha carfooni.

Saacad barkeed ka dib, dib ayaannu uga fuulnay oo jidkeennii waraqa Dantu hoos u la sii degnay. Haddii aannu sii durugnay, buuraha dhererkoodii waa shuuqay, bedkii dhulku wuu sinmay, derbiyadii qarka ahaana tartiib ayay inta u kala furmeen banka ku libdheen. Hawada kor ee cusub oo is jiidanaysa, halkanna jilicsan, qoyan oo diirran, iyo qorraxda kulaylkeedu daranyahay ayaan kaga qanacnay in aannu mar kale Hoobadyadii hoos joogno. Laba saacadood ayaannu gammaankeennii xagga koofur-bari ku tittirsiinnay oo dix ballaaran oo qalqalloocan ku degannay, annagoo ku dadaalaynay in aannu ceel walba dhuganno, se dhammaantood aan ugu tagnay iyagoo ciid qallalani ka buuxdo. Dabadeed, inta xagga bariga u leexannay ayaannu jarnay ban Dubayr ku magacaabay ’Battaladayti Taranay’ [?] oo aan laga aqoon dhulxeebeedka Saylac agaheeda ah. Kadinno geel ah iyo tirooyin ido ah oo dhex daaqaya Quracda qodaxda leh iyo Kulanka rucubbada ah, sadcaalayaasha caqday waxay u ahaayeen artagtiyo rayn leh. Waa markii ugu horraysay ee aannu aragnay qof dhaqaaqa, ka dib saddex beri oo koorakujoog adag noo ahaa. Xoolajirta oo dhammaan Makaahiil, Habar Awal ahaydna markii aannu soo dhowaannay ayay orod dibadda ku dhaceen. Ugu dambayn, mid ayaa geesinnimo uu ku joogsado oo ku warramo yeeshay. Weheliyeyaashaydii war san ayaa halkaa lagaga farxiyay. Dil badani ayaamahan ma dhicin, xagga xeebtuna waa marnayd oo wax cadwgayagii indhaha adkaa ah lagu ma sheegin, waa Reer Axamd e. Cawskii hirarka guban ahaa ayaannu caggta hore u sii saarnay oo xagga Jabal Almis afka saarnay. Waa tilmaansiga ugu wayn ee badmaaxyadu xeebtan ka ilaashadaan, ilikuwareedhayda ka sii shisheysaana waa daliig dhuuban oo buluug ah oo aannu indho faraxsan ku eegaayny [badda].

Waddadayadu waxay kala dhex martaa kuro gaagaaban oo bunni dhagaxnuuradeed iyo dhagaxciideed isugu jira ah, hoobadyada yaryarina ay saf firiqsan ka yeeleen inta u dhexaysa buuraha xeebta iyo badda. Muggan wadiiqadii waxaa cabburiyay geed-gaab jiq ah oo nooc Qurac ah. Waa Sarmaan ubaxeedda hurdiga ahi hawada udgiyay aan se lagaga biskoon nabarrada ay gaysato qodaxda laba inji ku dhowaadka dherer jeedda ee afka ku sidata caarad irbad la moodo. Markii aannu galabihii jiqdii ka soo baxnay ayaannu aragnay geelal badan oo aannu dadkii la jiray u yeernay, si ay noogu yimaadaan. Waxay ku falceliyeen in ay sidii goroyadii qararka ugu dhow ku caraaraan, iyagoo qayladhaaminaya. Markii aan u soo dhowaanayna nin walbaa wuxuu naga baryay in aannu xoolahaa deriskiisa dhacno. Intii aannu carriga Soomaaliyeed wareegaynnay, tan oo kale waligeed ma dhicin, aad ayayna iiga yaabisay xaaladda murugsan ee ay ku suganyihiin gobollada Habar Awal degto. Muddo yar dabadeed ayaannu badwi geeliisii ku oryaya oo ulaynaya si xasaasi leh ugu qalqaalinnay in uu na dhegaysto, haddii dhaarteennii u laabqaboojisayna wuxuu isku sheegay in uu Bah Goba yahay noo na ballanqaaday in uu na tuso degmo Reer Gadiid ah. Xammaali oo reerkan xidid la ahaa, soddogiisna in uu abbaankayga Berbera noqdo u sii qoondeeyay ayaa ballanqaaday


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

martigelin wacan. ’Caawa meel dugsoon ayaynnu seexan doonnaa, caanana waa dhami doonnaa’ ayuu nin walboo gaajaysani kii kale ku yiri, [kan dambana] isla marka ba wuxuu ku daraa ’aahey, hilib idaadna waannu cuni doonnaa.’

Gabbaldhacii dabadi ayaannu nimi degmo. Gammaankii ayaannu koorayaashii ka rognay oo ag fariisannay xeradii, annaga oo xeedhooyin cunno macaan ah niyada ku haynna. Iridda aqal ka soo horjeedkeenna ah waxaa jooga koox rag ah oo imaatinkeeda arkaysay se aan noo imaan, nana salaamin. Markii aan sugi waayay ayaan bastoolad riday, markaa oo cod iska hadle ah uu waydiiyay waxa aan geela la lisayo u didinayno! Waxa aannu ka soo kor dhacnay Reer Shirdoon’, cadowgayagii darnaa’, ayuu Yawmul Qiyaame ku faqay. Isla codkii hore ayaa haddana hadal ka sii kulul kii hore ku yiri ’ayaad tihiin?’ Si dhiirran ayaannu ugu jawaabnay ’Habar Garxajis!’ Dabadeed dagaal afka ah ayaa bilowday. Reer Shirdoonkii waxay warsadeen waxaannu doonaynnay, halka aan soo marnay iyo sida aan ugu dhiirrannay ee aan carrigooda u soo galnay, annaga oo u jeedna in beeluhu aanay heshiis ahayn. Si xushmad leh ayaannu intii aannu karnay ku jawaabnay, se wax wayn ku ma aannaan dheefin hadal macaani. Badwigii martisoorka xumaa wuxuu sheegay in imaanshahayagu uu ka dhiganyahay godka todobiyotobnaad ee Faalka , marti socota xilli aan ka dhicin  Kalends kii Giriigga [bilowga bisha], si edebdarro ahna ugu adkaystay in uu ogaado waxa Harar na geeyay. Ugu dambayntii, dagaalyahan laba waran ku hubaysan ayaa yimi oo inta qaabbilay ku foorarsaday Yawmul Qiyaame oo uu gartay. Hadallo aan badnayn dabadood ayuu dib u noqday oo iska tegay. Dabadeed, Guuleed Dheere ayaa waxaan faray in in uu kooxda u tago oo ku yiraahdo marti ayaa ardaaga joogta doonaysa in ay tubaako siisato xig caano ah. Si qayaxan ayay u diideen taa, dagaalna waa ka sheegeen. Dabadeed hubkeennii ayaannu diyaarsannay, oo inta baal ka tusnay u bandhignay in ay is keenaan oo noo yimaadaan, bal in ay dhereg’naga dheefaan iyo kale ha arkeen e. Intii lagu gudajiray nasashadii ka dambeysay caraatan cariiqsiga leh ayaannu baqlaheennii kooraysannay oo kaga sii fuulnay caro tii ugu darnayd, annaga oo kor u habaarayna urdufyada fulayda ah ee aan garanayn qiimaha martida.

Saddex degmo oo Reer Gadiid ah oo isku xiga ayaannu tagnay, Xammaali na xataa dhibic biyo ah ka ma aanu helin reer xididki, oo waliba cayna waa loogu daray. Martisoor xumadooda wuxuu u aaneeyay in raggii waxgalka ahaa oo dhami ay Berbera jiraan, degmooyinkana aysan joogin waxaan ka ahayn dumar, carruur, madiidinno iyo xoolo. Dubayr markii si fiican loo warsaday wuxuu sheegay in uusan jirin ceel Buulaxaar ka sokeeyaa oo laga cabbo. Maadaama ay dad iyo duunyaba asqo joogeen, waxaan go’aansaday in aannu hore u sii soconno oo habeenkaa meel biyo leh gaarno. Marar badan ayaa xoolaha la joojiyay dhaqaaqi waa' darti. Ciribta ayaan hore ugu sii dhuftay, intii kalena, sida mararkaan oo kale ay hore u barteen, iyaga oo aan juuq oran ayay i daba galeen. waddadayadu waxay dhex martaa bannaan lagu magacaabo Banka Haadla oo ay meelo badan ka jaraan biyamareenno qoto dhaadheer, cutubyo teel teel ah oo Kulan ahina ka taagtaaganyihiin. Dayaxii ayaa soo baxay, se ilays duruuri daahday oo aan


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

qummanayn ayuu keenay. Waxaa sii dheer, jidku noo ma caddayn, maadaama hagihihii oo daal la ildarani uu meel fog xagga dambe soo luudayay.

Habeenbarka abbaarihiisii ayaannu maqalnay cod farxadeed! Waa hugunka baddii oo meel fog ah. Haddii muusiiggaasi rejo na soo nibdaadiyay, hore ayaannu ugu sii durugnay, annaga oo faraxsan. Ugu dambayntii, Dubayr ayaa na hor galay, abbaarihii sagaal saac oo habeennimana waxaannu dix biyood ka helnay dhowr ceel oo biyo wiyeer ah oo aad u macaanaa, 15 saacadood oo harraad daran ah ka dib. Ka durduurasho maaddadaa ay roobab dhowaan da'ay biyadhigeen ayaa harraadkii naga ba'shay, meel aan sidaa u fogaynna waxaannu ka helnay kob caws adag oo gummud ahi uu baqalaheennii gaajo ka badbaadshay. Haddana, markii roob soo dhigtay ayaannu heeryooyinka hoostooda is duuduubnay, dabadeedna annaga oo aan dan ka gelin Reer Axmad iyo Reer Shirdoon midkoodna ayaannu sidii maydkii u seexannay.

Waaberigii, Janawari 30, ayaan kacay oo muuqaalka Buulaxaar indha'indheeyay. Cidla' ayay ahayd, marka laga reebo taallo wayn oo lafo caddaaday ah, waxa kaliya ee in meesha la degannaa tilmaamaya. Meeshani waayo hore waxay ahayd meel kobcaysa, waddada ay ku taal iyo colaadaha ka aloosnaa Berbera dartood. Guud ahaan, waxay ahayd degmo aqallo ah oo xoogaa daaro dhagax ah oo Carabi dhistay ay weheliyaan. Si ay ahaydba se, xeebtu waxay ahayd bannaan aan marso lahayn. Dabaysha Shimaaliga ah ee xataa dekedda wayn laga baqo halkan si xooggan ayay u kacsantahay. Sidaa oo ay tahay, meeshu waxay soo noolaataa marka kooxaha burcadda ah banka laga mari waayo. Ganacsatada colaadda necebi alaabta iyo dadkaba doon ayay soo saaraan, halka geelashooda dhanka khooriga laga soo wareejiyo.

Saacadu markii 12 maqrib gaadhay, ayaannu inta kooraysannay aayar xeebta baalqaadnay, si joogto ahna ugu hakannay bannaanka geedaha leh ee dixuhu jaraan. Duhurradii ayaannu badda ku mayrannay oo xaanida xoogaa fariisannay, dadkaygiina u ducaysteen fasax ay habeenkii ku maraan degmooyinka cadowgooda Reer Axmad. Codsigoodaan ugu dambeeyay si xikmad leh ayaa loogu gacansayray, oo haddii run la sheego, socod degdeg ahi markaan suuragal ma ahayn. Mid baqlaha ka mid ah xataa warankuna wadi waa, Xammaalina wuxuu ku khasbanaaday in uu kooraysto mid kale oo diif la dhaqaaqi la'. Dabadeed, waxaannu sii marnay bannaan ciid daadxoor ah leh, halkaa oo dhiiri sii labalaabay daalkii hayay xoolahayaga. Sagaal saac oo habeennimo ayaannu ku hakannay jaan caws ah oo ka hoosaysa fooca Dabasenis, kur ku taal kalabarka Buulaxaar iyo Berbera dhexdooda. Fiiqa sare ayaa la iga tusay wax socotada ka gariiriya, geed qodax leh harki oo Garxajis[21] iyo saaxiibbadoodii Muuse Ciise [Ciise

[21] Habar Garxajis [Garxajis], ama curadka ilma Sheekh Isxaaq (oo ay ka mid yihiin dhasha ‘Arab’), waxay degaan hoobadyada Berbera ka dambeeya, halkaa oo ay firiqsanyihiin ilaa meel dhawr caanamaal bariga carri Ogaadeen loo gaaro. Laftani waxay ka koobantahay jilbo fara badan. Ismaaciil Carre waxaa laga xulaa Suldaanka oo ah magac maamuus uun, sida Ugaaska Ciise. Waxay degaan inta u dhexaysa Maakhir ilaa koofurta Golis, waxayna tiro gaaraan ilaa 15000 oo gaashaan oo u sii kala baxa saddex lafood: Muuse


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Muuse] u fadhiyaan sidii coomaadi, iyagoo halkaa ka ilaalaynaya waxay dilaan iyo wax ay dhacaan. Mayl kale haddii aannu sii durugnay, waxaannu nimi ceelal ay khasab nagu noqotay in aannu xoolaheenna ku nasinno. Halkaa markii aannu cantuugadii ugu dambaysay cunnadeenii ku laasannay ayaanu ka fuulnay, oo inta banka xagga bari u raacnay habeen oo dhan in aan socod ugu jiidno isu diyaarinnay. Markii cadceeddii liicday, ayaannu midigta ka marnay kur tabta miis u samaysan oo sida muuqata ah fullaac ka soo go'ay hoobadyada buuralayda ama sisiladda xeebta. Sheekooyinka maxalliga ah ayaa kobtaan lagu sheegaa 'Awliyo Koombo', buurtii awliyada. Waxaa la sheegaa in halkaa oo 40 Wali oo Carab ahi ku shireen, ka hor intii ayan carriga Soomaaliyeed kala aadin, si ay Islaamka u faafiyaan. Waxay ku taallaa qiyaasta lix saacadood oo socod adag ah, marka Berbera laga tago.

Habeenbarkii ayaannu la soo laabannay tuulada Buulo Faranji[22], daliig yar oo dhul dhiri kaymaysay ah. Degmo ayaa hore u degganayd, maadaama ay biyo iyo caws badan leedahay, se markii aan soo marnay gebi ahaan cidla' ayay ahayd. Ilayska dayaxa ayaannu annaga oo sharqan la'a markii aannu xeebta la wareegaynay ku aqoonsannay degmooyin iyo xerooyinkii cadaowgayo Cayaal Axmad degganaa, mararka qaarna waxaannu kala aqoonsan karnay ci'da xoolayagooda. Weheliyaashaydii si aad ah ayay raynrayn ugu qosleen guusha ay ka gaareen xeeladdoodii,waana mid looga garaabo. Waxaa Berbera mar dambe na loo ku sheegay in xoolajire kaynta joogay uu na arkay oo in aan meesha marnay sheegay, halkaa oo Cayaal Axmad haaraameen ayaankii awoodda noo siiyay in aan dhulkooda dhex marno dhib la'aan.

Baqalahayagu socodku dirqi ayuu ku ahaa. Intii leeb la ganay gaaro marka ay socdaan ba dhulka ayay isla dhacaan, waxaan nadi ahaynna lagu ma kicinayn. Dabadeed, nasashada minqaadkii ugu dambaysay ayaa lagu dhawaaqay, markii aannu Berbera afar mayl u soo jirnay, Qiyaame iyo Guuleed Dheere oo dhacsaal ahaana hurdo ayay dhagxaanata dushoodii la dhaceen. Kooxdii oo dhan, Xammaali kaliya ayaa wax tabar iyo firfircoonaan ahi ku hareen. Ninkaa hargaantiga ahi waa sheekeeyay, heesay oo oriyay. halka kuwa kale ay dirqi baqalahooda ku fuushanaayeen, isagu boolaxooftadiisii dagaal ayuu cayaaray oo warankiisiina walwalciyay. Aad baan ugu farxay 'ninkarmeednimadaa.'

---

Carre wuxuu degaa inta u dhexaysa Golis ilaa lagu geeyo carriga xeebta Majeerteen iyo Warsangeli. Isaaq Carre waxay tiro gaaraan 5000 ilaa 6000 gaashaan, waxayna degaan carriga buuraha Golis. Wiilashii kale ee Carre ( da' afaraad Isxaaq), waxaa ka mid ah Mikaahiil, Gambah [?], Daudan **[?]** iyo kuwo kale oo iyaguna lafo yar yar oo gooni ah noqday. Cayaal Daa'uud, oo lagu naanayso Ciidagale, ahna faracii wiilkii labaad ee Garxajis, waxay degaan dhulka koofur ka xiga Habar Awal. Waxay garaan ilaa 4000 oo gaashaan, waxayna u sii kala kala baxaan ilaa11 ama 12 jilib.
Sida la soo xusay, Habar Garxajis waxaa colaad iyo aano joogto ahi kala dhexaysaa Habar Awal oo xataa Cadan ruuxeeda ay dhawr mar budhad iyo shiid iska la daaleen. Sidaa oo ay tahay, sidii ilma adeer is jecel ayay colka labadooda ba aan daynayn u midoobaan, sida Ciisaha. Burton

[22] Magacan waxay kula baxday, sanadii 1852 ayaa lagu dhacay markab la oran jiray *Mary Anne* oo uu Ingiriisku lahaa. –*Burton*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Markan daliig dheer oo madow ayaa ilikuwareedhayda ka soo muuqatay. Gabbaldhaca ayay si fiican u muuqataa oo mukulaha maraakiibtu ay ku soo baxaan isqabadka badda iyo cirka. Dabadeed, or farxadeed ayaa qof walbaa afka ku shubtay. Farxa ragow, farxa, wixii dhib aannu soo marnay naga hare e!

Yawmul Qiyaame ugu hoorrayn sharqanta hoose ee dareenka ayuu si taxaddar leh u dhegaystay. Wuxuu si xasaasi ah ugu faqay in aan la sharqamin, waa intaa oo cadow nagu toosaaye. Gacanyareyaashayda kale magan abbaan ayay ku lahaayeen Berbera, se isaga waa la necbaa, waxaana looga baqayay in uu *wakiil* u yahay Sharma'arke oo isaguna *karaahiye* la necebyahay ah, aniguna aan madaxiisa ku joogo. Dubayr si aayar feejignaan leh ayuu dhanka daanta koofureed ee magaalada hurudda naga wareejiyay oo tuurar lafo ah iyo dhidirro raqda aan nahda lahayn feenfeenanaya na sii dhex mariyey. Ugu dambayn, toos ayaannu u aadnay daantii ay deggenaayeen Reer Gadiidkii abbaannayada ahaa. Si aannaan sugan karin ayaan u waraystay in jaallayaashaydii kale ay magaalada ka tageen, war sanna waxaan ku maqlay in ay i sugayeen.

Markaa waxay saacaddu maraysay siddeed saac oo habeennimo, waxaana aan soo jarnay ugu yaraan afartan mayl. Soomaalidu marka ay col ka baqayaan masaafadaa awrta raran waxay ku mariyaan ilaa toban saacadood. Dabadeed waxaan ku degay aqalkii jaallayaashaydu ku noolaayeen. Soo dhowayn farxad leh, aqool bariid ah iyo koob khamri ah – ha ii qaban gacaliye L[umsdenoow], waxyaalahaasi waxay mayreen wax la'aantii iyo daalkii hore e. Adeegayaashii iyo gammaankii rafaaday ba waa la quudiyay. Dabadeedna, hurdo ayaan la dhacay, aniga oo og in aan gutay hawl culus oo sidii York la galay u dhiganta, diiwaannada taariikhda na waayo badan ku oolli doonta.

Mahadsanidin

Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame
Email: Bodhari.warsame@gmail.com

__________

*Boodhari waa qoraa tarjumay ama gacanta ku haya buuggaag badan oo qiimo taariikheed ku leh Soomaaliya. Waxa uuna si joogto ah qoraaladiisa ugu soo ban dhigaa degelka WardheerNews*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved